

Helitaanka Diiwaanka Talaalka COVID-19



Somali

Sida lagu helo nuqul ka mida diiwaankaaga talaalka COVID-19

Waxaa lagu xusayaa **gal taariikheedkaaga talaalka COVID-19 noqul** cadaynta in lagu talaalay (Immunisation history statement).

Marka aad qaadato qiyaasaha talaalka aad u buhaahantay, ayaad sidoo kale helidoontaa shahaadada talaalka **COVID-19 oo digital ah** (COVID-19 digital certificate).

Meelaha aad ka heli karto shahaadada cadaynta talaalka COVID-19 waa:

- **Medicare online account**
- **Express Plus Medicare app**
- **My Health Record**
- **Individual Healthcare Identifiers Service**
- **Australian Immunisation Register**



Bartaada Medicare ka aad ku leedahay internetka

1. Ka gal bartaada internetka **myGov** (my.gov.au) islamarkaana dooro **Medicare**
2. Qaybta Taariikhda Talaalka, **Immunisation history dhexdeeda, dooro View immunisation history**
3. Dooro magacaaga
4. Guji arag bayaan taariikheedka talaalka, (PDF) (**View immunisation history statement (PDF)**) ama arag shahaadada digitalka ee COVID-19 (PDF), (**View COVID-19 digital certificate (PDF)**).

Aabka Adeega caafimaadka

1. Fur aabka oo gal
2. Qaybta Adeega (**Services**) ka dooro, taariikhda talaalka. (**Services (Immunisation history)**)
3. Dooro magacaaga
4. Guji arag bayaan taariikheedka talaalka, (PDF), (**View immunisation history statement (PDF)**). ama arag shahaadada digitalka ee COVID-19 (PDF). (**View COVID-19 digital certificate (PDF)**).

Diiwaanka Caafimaadkayga (My Health Record)

Waxaad ka heli kartaa cadaynta talaalkayga COVID-19 barta taariikhda caafimaadkaaga, (My Health Record).

Haddii aad leedahay barta taariikhda caafimaadkayga (My Health Record):

1. Gal bartaada Internetka ee **myGov** (my.gov.au) islamarkaana dooro **My Health Record**
2. Fur bartaada caafimaadka
3. Ka hel cadaynta talaalkaaga barta diiwaanka bageeda hore (**Record Home**) ama boga arag talaalada (**Immunisation view**, dooro dukumentiyada, talaalada, (Select **Documents, Immunisation**))

Haddii aadan lahayn barta taariikhda caafimaadkayga (My Health Record), laakiin aad leedahay kaarka caafimaadka (Medicare Card):

1. Gal bartaada **MyGov** (my.gov.au) islamarkaana ku xiriiri **My Health Record**
2. Xaqiiji aqoonsiyadaada oo samee Diiwaanka Caafimaadkayga (**My Health Record**) hubi in aad doorato 'Haa' ('Yes') si aad ugu guuriso xogta talaalada (Medicare Information) Diiwaanka Caafimaadkayga (MY Health Record)
3. Gal Diiwaanka Caafimaadkayga (open My Health Record)
4. Ka hel cadaynta talaalkaaga barta diiwaanka bageeda hore (**Record Home**) ama boga arag talaalada.

Helitaanka Diiwaanka Talaalka COVID-19

Adeega Aqoonsiga Daryeelka Caafimaadka ee shakhsiga (haddii aadan haysan kaarka caafimaadka)

Haddii aadan lahayn kaarka caafimaadka oo aad rabto in aad internetka ka heshid cadaynta talaalkaaga, waxaad u baahantahay aqoonsiga daryeelka caafimaadka (An Individual Healthcare Identifier (IHI)). Haddii aadan lahayn IHI, waxaan ka dalbankartaa internetka.

Wixii xog dheeraada booqo mareegta hoos ku xusan.

www.servicesaustralia.gov.au/individuals/services/medicare/individual-healthcare-identifiers/how-get-ihl

Marka aad hesho IHI, waxaad cadaynta talaaladaada ka helikartaa bartaada myGov.

1. Ka gal bartaata **myGov** (my.gov.au) isla markaana dooro adeega aqoonsiga daryeelka caafimaadka shakhsiga (**Individual Healthcare Identifiers service**)
2. Qaybta **adeega**, ka dooro taariikhta talaalka (**Immunisation History**)
3. Guji arag bayaan taariikheedka talaalka, (PDF). (**View immunisation history statement (PDF)**), ama Arag shahaada digitalka ee COVID-19 (PDF), (**View COVID-19 digital certificate (PDF)**).

Diiwaan Geliyaha Talaalada ee Australia

Haddii aad internetka ka heli kariwaydo cadaynta talaaladaada COVID-19,

ka wac Diiwaan Geliyaha Talaalada ee Australia (**Australian Immunisation Register**) **Taleefoonkan 1800 653 809** xiliyada u dhexeeya 8:00da subaxnimo iyo 5:00ta galabnimo, maalmaha Isniita ilaa Jimcaha.

Waydii in luguu soo diro nuqul ah taariikhda talaaladaada (**immunisation history statement**).

Waxay qaadan kartaa illaa 14 maalmood in boostadu kuu keento.


Haddii aad turjubaan u baahantahay ka wac **telefoonka adeega turjubaanada ee (TIS) 131450**.

Mareegaha internetka ee muhiimka ah

Wixii xog dheeraada si aad heshid taariikhta talaaladaada **Iskaan ku samee QR hoos ku xusan**



Si aad u hesho xog dheeraada oo ku saabsan barnaamijka talaalka ee NSW **iskaan ku samee QR hoos ku xusan**



Iskaan ku samee QR hoos ku xusan si aad u ogaato sida ugu fudud ee aad uga heli karto internetka cadaynta talaaladaada COVID-19

